Qeexida Xalalka Waara iyo qaab-dhismeedka

Qayb ka mid ah Istaraatiijiyadda Xalalka waara ee Qaranka.
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qaab-dhismeedka Guddiga Joogtada ah ee u dhexeeya Hay'adaha (IASC) wuxuu go'aaminayaa in "xal waara la gaaro marka Barakacayaasha aysan mar dambe helin gargaar gaar ah iyo baahiyo ilaalined oo la xiriira barokacooda oo dadka noocaas ahna ay ku raaxeysan karaan xuquuqdooda aadanaha iyadoo aan loogu kala eexanayn barakacooda awgeed. . ” Waxay sii qeexaysaa seddex dariiq oo loo maro xalalka waara: (1) Dib-u-dhexgal waara oo laga helo goobta asalka ("laabasho"); (2) Is-dhexgalka waraa oo ka hergala deegaanka meelaha ay magangeliyada u aadeen ("is-dhexgalka maxalliga ah"); (3) Is-dhexgal waara oo laga helo qayb kale oo dalka ka mid ah (dib u dejin / degsiimo meel kale oo dalka ka mid ah).

MUUQAALKA GUUD EE XALALKA WAARA EE SOMALIA

Qorshaha Horumarinta Qaranka-9 iyo Siyaasadda Qaranka ee Qaxootiga - Dadka soo noqday iyo Barakacayaasha, DFS waxay isku xilqaantay, iyo kuwo kaleba, fududeynta dib u noqoshada ikhtiyaariga ah, dib u dejinta, iyo isdhexgalka maxalliga ah (soo-celinta) qaxootiga soo laabtay iyo barakacayaasha. Mabda'a 4aad ee siyaasadda qaranku wuxuu leeyahay:

- Dhammaan hay'adaha dowladda federaalka, mas'uuliyiinta dowladdaha FMS, iyo Maamulka Gobolka Banaadir (BRA) waxay leeyihiin waajibaadka iyo mas'uuliyadda koowaad inay dejiyaan shuruudo, sidoo kale inay bixiyaan hababu u oggolaanaya qaxootiga soo laabtay iyo barakacayaasha inay si xor ah oo aqoon leh u doortaan inay soo noqdaan si ikhtiyaari ah, bedqab iyo sharaf leh, guryahooda ku soo laabtaan ama meelaha ay ku noolaan jireen caadiyan, ama ay isdhexgal deegaan ka sameeyaan meesha ay ku sugan yihiin ama ay si iskood ah u degaan deegaan kale oo dalka ka mid ah.

- Qaxootiga soo-noqday iyo barakacayaasha Soomaaliyeed waxay xaq u leeyihiin inay si iskood ah ugu noqdaan deegaanadii ay ka yimaadeen ama ay degaan meel ka mid ah dalka, si ay ugu noolaadaan sharaf, xushmad, barwaaqo, iyo xorriyad.

- Dhammaan dhinacyada ay khusayso waa inay sameeyaan dadaal gaar ah si loo hubiyo ka-qaybgalka buuxa ee qoxootiga soo-noqday iyo barakacayaasha naftooda ee qorshaynta iyo maaraynta soo noqoshada, is-dhexgalka maxalliga ah, ama dejinta qayb kale oo dalka ka mid ah.

DFS waxay aqoonsan tahay in dhaqdhaqaaqa dadka kaliya uusan kaligiis noqon karin xal waara

Iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka IASC, helitaanka xal dhab ah oo waara ayaa badanaa ah geeddi-socod muddo-dheer ah oo si tartiib-tartiib ah u yareynaya baahiyaha gaarka u ah ee barakaca, iyadoo la hubinayo in dadka barakacay ay ku helaan xuquuqdooda iyadoo aan loo takoorin wax la xiriira barokacooda.

Istaraatiijiyadda xalalka waara waxay qaadataa dhamaan bulshada uu saameysay barakaca ee lagu bartilmaameedsanayo difaaca iyo gargaarka baahiyaha barakacayaasha, qaxootiga soo noqday, qaxootiga iyo magangalyo doonka iyo bulshooyinka martida loo yahay ee saboolka ah. DFS waxay xaqiijineysaa xuquuqda dadka barakacayaasha ah ay uleeyihiin inay sameeyaan xulasho xog-ogaal ah oo ikhtiyaari ah oo ku aadan nooca xalka waara ee ay doonayaan inay raadsadaan oo ay ka-qaybqaataan qorshaynta iyo maaraynta xalalka waara.

Intaa waxaa sii dheer, Istaraatiijiyadda Xalalka waara ee Qaranka waxaa haga qaabdhismeedka IASC Framework, halka ujeeddooyinka istiraatiijiyadeed ay diiradda saarayaan joojinta u nuglaanta ay dhaliyaan barakacyada. Sidaa darteed, waxay diiradda saaraysaa shuruudaha aasaasiga ah ee xalalka waara kuwaas oo ah

1. Badbaadada muddada-dheer, amni iyo xorriyadda dhaqdhaqaaqa;
2. Heer nololeed oo ku filan, oo ay ku jiraan ugu yaraan helitaanka cunto ku filan, biyo, hoy, daryeel caafimaad iyo waxbarasho aasaasi ah;
3. Helitaanka shaqo iyo Habnololeed;
4. Helitaanka hababb wax ku ool ah oo soo celiya guryahooda, dhulkooda iyo hantidooda ama siiya magdhow;
5. Helitaanka iyo beddelka dukumiintiyada shaqsiyadeed iyo kuwa kale;
6. Isukeenid ikhtiyaari ah oo loo sameeyo xubnaha qoyska kala ambaday inta lagu guda jiray barakaca;
7. Ka qayb qaadashada arrimaha bulshada ee heerarka oo dhan iyadoo loola siman yahay dadka deggaanka; iyo
8. Qalad saxid wax ku ool ah oo loogu talagalay xadgudubyada la xiriira barakaca, oo ay ku jiraan helitaanka caddaalad, magdhaw iyo macluumaad ku saabsan sababaha xadgudubyada.

DRAFT